# Buuga Amaanka Cuntada

HAMILTON COUNTY PUBLIC HEALTH

PREVENT. PROMOTE. PROTECT.

Franklin County Public Health

Originally developed by Franklin County Public Health. Adapted with permission by Hamilton County Public Health.

Raac nidaamka badbaadada cuntada si aad u ilaalisa caafimaadka shacabka.

# Shaxda Macluumaadka


Qaybaha Khatarta . . . . . . . . . . . . . .3
Waraaqaha Loo Baahan Yahay . . .5
Dhacdada Dheecadana Jidhka . . .8
Wakhtiga Xakamaynta Caafimaadka Shacabka. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .11
Xakamaynta/Ka Saarida Cayayaanka . . . . . . . . . . . . . . . . .12
Hoyga. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .13
Farxalka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .14
Shuruudaha Bulaacada Gacanta15
Isticmaal Golofis . . . . . . . . . . . . . . .16
Xakamaynta Timada . . . . . . . . . . .17
Cunista/Cabista/Shayada Shakhsi Ahaaneed . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .18
Nafaadaha Shaqaalaha. . . . . . . . .19
Heerkulka/Wakhtiga/TCS . . . . . . . .19
Diyaarinta Cuntada/Cuntooyinka Diyaar u Ah Cunista . . . . . . . . . . . .21
Heerkulbeega . . . . . . . . . . . . . . . . .22
Cuntada La Heley. . . . . . . . . . . . . .23
Haynta Qabawga . . . . . . . . . . . . . .23
Kaydka Cuntada . . . . . . . . . . . . . .24
Hilibka Qaydhiin . . . . . . . . . . . . . . .24
Barafaynta Cuntada . . . . . . . . . . .25
Maydhista Dalaga . . . . . . . . . . . . .26
Looxa Lagu Jarjaro . . . . . . . . . . . .27
Heerkulka Wax Karinta . . . . . . . . . .28
Dib U Diirinta Waxa Soo Hadhay. .29
Haynta Kulaylka . . . . . . . . . . . . . . .29
Qaboojinta Cuntada . . . . . . . . . . .30
Ku Qorista Taariikhda . . . . . . . . . . .31
Calaamadaynta/Sumada . . . . . .32
Xasaasiyado . . . . . . . . . . . . . . . . . .33
Talada Macmiilka . . . . . . . . . . . . . .34
Uga Shaqaynta Amaanka ah. . . . .34
Cuntada Guriga Lagu Sameeyay 35
Daasad Furaha . . . . . . . . . . . . . . . .36
Daasadaha . . . . . . . . . . . . . . . . . .36
Agabka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .37
Shayada Marka Kaliya La Isticmaalo 38
Kaydka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .38
Sadex Lakab Diyaarinta Bulaacada . . . . . . . . . .39
Nadiifiyaha. . . . . . . . . . . . . . . . . . .40
Agabka Nadaafada . . . . . . . . . . .42
MIshiinka Weelka Maydha. . . . . . .43
Masaxaada . . . . . . . . . . . . . . . . . .46
Nadiifiyaha Mishiinka Barafka . . . .46
Mishiinka Nadiifiyaha Hilibka . . . . .47
Qasabado . . . . . . . . . . . . . . . . . . .49
Quruuradaha Kimikaalka La Buufiyo49
Taangiga Biyaha Kulul . . . . . . . . . .49
Dhaxalka Biyaha/Maamulaha Kulayliyaha. . . . . . . . . . . . . . . . . . .50
Xayawaanka/Xayawaanka Carbisan 55
Jawaabta Dabka . . . . . . . . . . . . . .56
Khayraadka/Agabka Madhay . . .59
Siyaasada Xanuunka . . . . . . . . . . .73
Wakhtiga Caafimaadka Shacabka Siyaasada Xakamaynta. . . . . . . . .76
Duwaanka Amaanka Cuntada . .77

# QAYBAHA KHATARTA

## Khatarta Heerka I

**WALAACYADA GUUD:** Nadaafada, calaamadinta, ilmaha, nidaamka kaydka, taariikhda ay ku eeg tahay

- Wakhti lama hayo/maamulida heerkulka ee amaanka cuntada iyo sharaabka (bunka, sharaabka meesha kaliya laga shubto, wixii qasaacadaysan)
- Cuntada qasaacadaysan ee wakhtiga aan kudhicin/heerkulka la maamulay ee amaanka cuntada
- Cuntada qasaacadaysan ee talaagada la geliyo iyo/ama la bareefo/heerkulka la maamulay ee amaanka cuntada
- Cuntada ama caanaha caruurta

## Khatarta Heerka II

**WALAACYADA GUUD:** Heerka I: taabashada, caafimaadka shaqaalaha; macquuliyada ugu yar ee in wasakh uu yeesho

- Keegaga ee wakhtiga aan kudhicin/heerkulka la maamulay ee amaanka cuntada
- Soo saarka alaabaadka macmacaanka
- Alaabta badan ee aan duubnayn ee wakhtiga aan kudhicin/heerkulka la maamulay ee amaanka cuntada
- Wixii qasaacadaysan ee wakhtiga aan kudhicin/heerkulka la maamulay ee amaanka cuntada ee meel kale lagu soo sameeyay
- Digniinta cuntada ee weelka sida wanaagsan u xidhan ee warshad samaysay iyo ka shaqaynta markaas ee iibka tafaariiqda ama adeega
- In lagu hayo cuntada keeni karta waxyeelada heerkulka ku haboon ilaa inta loo hayo iibinta ama adeega hadii lagu helo 135˚ F ama ka sareeya
- U diyaarinta barafka iibka tafaariiqda
- Diyaarinta iyo/ama adeega ee wakhtiga aan kudhicin/heerkulka la maamulay ee amaanka cuntada oo kaliya
- Farta gelinta macaanka barafka ah; afka waxa macaan uu kusoo baxo
- Cuntada qasaacadaysan, ee ku filan qofka ee laga heley cid liisan leh ama warshad aan meesha ku oolin oo iyada oo qabaw ama kulul isla markaba dadka la siiyo
- Ka helida cuntada cida liisanka leh ama cida samaysa ee aan meesha ku oolin iyada oo ku jirta weel wayn oo lagu hayo/la qaybiyo iyada oo isla heerkulkii lagu heley a

## Khatarta Heerka III

**WALAACYADA GUUD:** Heerka 1 iyo 2; qabooyinka saxda ah, qaboojin, hayn; sunta; qaabka loo hayo kulaylkeeda

- Ka shaqaynta, jarjarista, ama ridqida wixii hilib ah
- Jarjarinta ama jarjarka hilibka ama jiiska qadada
- Isku keenista ama ku karinta wakhti/heerkul la maamulay si loo helo amaanka cuntada oo markaa la bixinayo, lagu haynayo kulayl/qabw, ama isaga oo karsan
- La kaliyay/diyaar ah, la kaliyay/la kalriyay, la kariyay/kulayl lagu haynayo, la kariyay/la kariyay/qabaw lagu haynayo
- Ka shaqaynta talaakada leh afka kulaylka wax lagu sameeyo
- Alaabaadka la kululeeyay ee leh bushqada moorsan iyo haynta kulaylka
- Karinta, qaboojinta, ku darka waxyabaaha qaydhiin ee dheeraadka ah, kulul ku haynta
- Dib u kulaylka inta qof cuni karo oo kaliya
- Qasaacadaynta, kululaynta, yaraynta ogsajiinta ku jirta bushqada, qiijinta si loo dheereeyo cimrigeeda, sharaab miirista, samaynta khamrida, wixii si gaar ah loo samaynayo

## Khatarta Heerka IV

**WALAACYADA GUUD:** Heerka 1, 2, 3; dhawr talaabo oo diyaarinta ah iyo xakamaynta heerkulka sida loogu baahdo; nidaamyada gaarka ah

- Karinta/karinta/kulayl ku haynta; karinta/haynta/qaboojinta/dib u samaynta (iyada oo lagu daro ama aan lagu darin waxyaabo dheeraad ah)
- Wakhtiga lagu bedelayo heerkulka
- Wakhtiga qaadista/xakamaynta heerkulka ee amaanka cuntada sida weelka lagu qaado
- Waxaa lagu isku siiyaa khatarta sare (dadka difaaca jidhkoodu liito ama waayeelka ah ee daryeelka caafimaad/xarumaha kaalmada nolosha ku jira
- Siinta hilib, digaag, kaluun ama cunto kale qaydhiin oo waxyeelo keeni kara oo ku jira shayadan
- Ku karinta heerkulka ugu yar ee loo baahan yahay
- Iibinta iystar, clam, ama mussels ee selfiishka ku nool barkada
- Loo qaboojiyay qaab barafayn ah
- Wixii nidaam ah ee u baahan waxyaabao ka duwan kuwa Waaxda Caafimaadka Ohio (ODH) ama Waaxda Beeraha Ohio (ODA), ama wax ka duwan Xeerka Cuntada
- Dib u diirinta cuntada badan ee shayada cuntada wax ka badan 7 maalmood oo kasta

# WARAAQAHA LOO BAAHAN YAHAY

Ilaalinta xaruntaada

## 1 Liisanka cuntada

Ohio Department of Health

Liisanka Shaqada Adeega Cuntada

Lambarka Hantidhawrka:

Lambarka Liisanka: 12030

Liisan Haystaha: Franklin County Public Health. 280 E Broad St, Columbus, OH 43215

Macaga Liisan Haystaha Xarunta: Tijaabinta Maqaaxida 1

Cinwaanka/Magaalada/Gobolka/Zip-ka: 3662 Breamere Dr Colorado Springs CO 80922

Qaybaha Sharaxa: Aan Ganacsi Ahayn FSO > 25,000 isku wareeg fuudh, Khatarta Heerka III

Liisankan waxaa loosoo saaray si waafaqsan shuruudaha Cutubka 3717 ee Xeerka Dib u Eegista Lagu Sameeyay ee Ohio oo waxa ka waajiba in lagala noqdo ama la joojiyo wixii keenaya iyo in aan la wareejin kari iyada oo aan ogolaanshe laga haysan liisan haystaha.

**Liisan kan waxa uu dhici doonaa Diseember 02, 2021**

Hadii tani tahay shaqo adeega cuntada ee wareegta, liisanka ma shaqaynayo ilaa inta macluumaadka haynta ay kasoo baxayso dhnak kale-

Taariikhda

Joe Mazzola. MPA
Gudoomiyaha Caafimaadka

HEA 5305 (Dib u eegid 04/13) Liisankan waxaa in lasoo dhigaa meel muuqata oo goobta ah. Waaxda Caafimaadka ee Ohio

## 2 Tobobarka Shaqaalaha

### SHAHAADADA MAAMULIDA EE BADBAADADA CUNTADA

- Kadib marka la baaso koorsada ansixinta (Tusaale ahaan: ServSafe®), ku dalbo ODH.
- Hal xubin shaqaalaha maamulka ah waa inay haysataa shashaadadan hadii xaruntu ay ku jirto Khatarta heerka 3 ama 4.

Ohio Waaxda Caafimaadka

Maamulaha Caafimaadka waxa uu xaqiijiyay Taariikhda

TIJAABO TIJAABO

waxaa si wanaagsan loo dhamaystirtay
Shahaadada Maamulaha ee Badbaadada Cuntada

Bixiye

Maamulaha Caafimaadka

HEA 5318 (Dib u eegid 1/19) Lambarka Shahaadada: TIJAABO TIJAABO

### QOFKA KA MASUULKA AH (PIC) FASALKA HEERKA 1

- Tobobarka onleynka ah ee Tusaale ahaan: ServSafe®.
- Hal ruux gelinkii ayaa loogu baahan yahay fasalka Heerka 1.
- Hadii xarunta ay ku jirto KHatarta Heerka 3 ama 4, Heerka 1 ee shaqaaluhu waa inay joogaan wakhti kasta oo qof haysta Shahaadada Maamulka ODHA ee Badbaadada Cuntada aanu joogin.

**PIC:** Shaqaalaha ka masuulka ah xarunta wakhtiga baadhitaanka

## 3 Siyaasada Xanuunka Shaqaalaha

- Dhamaan shaqaalaha sameeya cuntada waa inay saxeexaan nuqul. Saxeexa waa inay arkaan dhamaan baadhayaashu.

- Joog guriga hadii aad xanuunsanayso.

Ujeedada heshiiska waxaa weeye in loo sheego shaqaalaha cuntada iyo shaqaalo shardiga (shaqaalaha la filanayo in mustaqbalka la qaadan karo) masuuliyadooda si loogu sheego (PIC) marka ay la kumaan wax xaaladaha ku qoran ah si markaa PIC ay u qaadi karto talaabada lagaga hortagayo faafitaanka xanuunka cuntada ka dhasha. Tani waxaa weeye kaliya Khatarta Heerka II, III iyo IV ee xarumaha. Khatarta Heerka I loogama baahna inay yeelato wax siyaasada xanuunka ee shaqaalaha ah. Shaqaalaha cuntada ama shaqaalo shardigu waa inay gaadhsiiyaan macluumaadka sida taariikhda marka astaamaha xanuunku ama xanuunku uu marka hore bilaabmo, ama shaybaadhka xanuunka aan lahayn wax astaamo ah. *(Ka eeg boga 74 wixii heshiiska dhamaystiran ah)*


**SIYAASADA CAAFIMAADKA SHAQAALAHA:** BARNAAMIJKA AMAANKA CUNTADA

Franklin County
**Public Health**
280 East Broad Street
Columbus, Ohio 43215-4562
614.525.3160 I myfcph.org

**Shaqaalaha Cuntada ama Heshiiska Warbixinta Shaqaalaha ee Shardiga ah**

**WAXA AAN OGOLAADAY IN AAN GAADHSIIYO PIC:**
Wax kamid ah astaamaha soo socda, iyada oo la shaqaynayo ama wixii ka baxsan shaqada, oo waxaa kamid ah taariikhda astaamuhu marka kowaad ay bilaabmeen:

1. Shuban
2. Hunqaaco
3. Jooniska (huruudaha indhaha ama maqaarka)
4. Cuno xidhan oo leh xumad
5. Nabur leh dheecaan sida nabur caabuq oo karaya ama afka kala haya oo ku yaala gacanta, dhudhunka, qaybta furan ee gacnaha ama qaybaha kale ee jidhka (iyada oo naburka uu ku xidhan yahay moojee golis ama uu baandheej qalalan, si wanaagsan u le'eg).

**Hadii daryeelka caafimaadka bixiyaha uu iga heley wax xanuun ah oo lagu sheegey hoos, PIC waa inay gaadhsiisaa Caafimaadka Shacabka Degmada Franklin marka shaqaalaha laga helo xanuunka ama xaalada:**

**A) Wixii kamid ah xanuunada soo socda:**
1. Campylobacter
2. Cryptosporidium
3. Cyclospora
4. Entamoeba histolytica
5. Shiga toxin-producing Escherichia coli (STEC)
6. Giardia
7. Joonis A
8. Fayraska Noro
9. Salmonella spp.
10. Salmonella Typhi
11. Shigella
12. Vibrio cholera
13. Yersinia

**B) Wixii xanuun ah ee uu daryeelka caafimaad bixiye uu sheegey, sadexdii bilood ee lasoo dhaafay oo ka timid Salmonella typhi (oo loo qaatay daawaynta antiboodhiga).**

**C) 1. Hadii laga shakiyo in aan keeney, ama aan joogay meel xanuunka cid qabtaayi ay joogtay;**
**2. Aan joogto ama aad ka sahqayso meel ay ka jirto xanuunka faafa oo xidhan;**
**3. Aad guri kula nooshahay qof laga heley xanuunka ama**
**4. Aad kula nooshahay guriga qofka taba meel ama kala shaqeeya meel xidhan oo laga heley safmarka oo kamid ah kuwa soo socda:**
1. Fayraska Noro afar sideed iyo afartanki lasoo dhaafay aad u dhawaatay cid qabta.
2. Shiga toxin-producing Escherichia coli (STEC) aad u dhawaatay cid qabta tobankii maalmood ee lasoo dhaafay.
3. Shigella spp. ad u dhawaatay cid qabta afartii maalmood ee lasoo dhaafay.
4. Salmonella Typhi ad u dhawaatay cid qabta afartii maalmood ee lasoo dhaafay.
5. Jooniska ad u dhawaatay cid qabta kontonkii maalmood ee lasoo dhaafay.

SAXEEXA SHAQAALO SHARDIGA — TAARIIKHDA

MAGACA SHAQAALO CUNTADA (DAABACAN)

SAXEEXA CIDA RUQSADAHA HAYSANA AMA SAWIRKA

TAARIIKHDA

**Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo www.myfcph.org ama kala hadal Barnaamijka Amaanka Cuntada (614) 525-3160.**



## 4 Ka jawaabida Dhacdada Hunqaacida ama Shubanka

**MACLUUMAADKA TAARIIKHDA:** Marka shaqada adeega cuntada ama xarunta cuntada iibsiga ay la kulnay dhacdo dareere jidhka ah, isla markaba taxadir waa in la sameeyaa. Khatarta inay gaadho agabka cuntada, shaqaalaha, iyo macaamiisha ayaa la yarayn karaa hadii qorshaha nadiifinta ee socda ah la raaco. Isticmaalka talaabooyinka soo socda oo ah hagayaasha lagu yaraynayo saamaynta dhacdada soo gaadhka dheecaanada jidhka.

1. **SHAQAALAHA U GAARKA AH:** Waa inaad shaqaale u igmato ka masuul ah nadiifinta dhacdada dheecaanada jidhka. Xubnaha shaqaaluhu waa inay la socdaan nidaamyadan oo ay garanayaan sida Agabka Badbaadada Shakhsi Ahaaneed (PPE) loo xidho, iyo nidaamka nadiifinta ah ee saxda ah ee dhacdada dheecaanada jidhka ee kusoo gaadha.
2. **DIYAARINTA BUSHQADA NADIIFINTA:** Bushqada nadiifintu waxaa weeye shayga kowaad ee ugu wayn ee lagaga jawaabo dhacdada dheecaanka jidhka. Bushqadu waa inay ku jiraan alaabta ugu yar ee socda:
   - i. Agabka Badbaadada Shakhsi Ahaaneed
     1. Golofiska Caafimaadka ee La Daadiyo
     2. Dahaadhka Kabaha
     3. Badbaadada Indhaha
     4. Koodh/Gown
   - ii. Agabka Nadiifinta
     1. Bacda moorsan ama bacda wasakhda ah
     2. Soofti
     3. Majarafad
     4. Jeermisdile
     5. Boodhar qaate (litirka bisada, ciid, ama boodharka wax nuuga)
3. **NADIIFINTA GOOBTA WAX KA DHACEEN IYO AAGA KU XEERAN:** Isticmaalka nidaamka nadiifinta la ansixiyay ee soo socda si meesha looga saaro dheecaanka jidhka iyo jeermis ka dilka aaga ku xeeran.

### NIDAAMKA NADIIFINTA

1. Marka si sax ah loo raaco, nidaamyada nadiifinta waxay ka caawinaysaa yaraynta khatarta markaas ah ee wasakhda dheeraadka ah.
2. In la xidho PPE-ga saxda ah. Xaqiijinta in dhamaan aaga wax soo gaadheen ee wajiga iyo gacmaha laga ilaaliyo wasakhda soo gaadhi karta.
3. Waxaa ku jira dheecaan. Isticmaalka kilinikiska iyo boordharka nuuga ee lagu daadinayo dheecaanka.

4. Jeermis ka dilka aaga wasakhda ah oo dhan. Isticmaalka jaafeesha ugu yaraan ah 5000 ppm ah meelaha ilaa 25 fuudh u jira meesha wax ka dhaceen. Waxaa kamid ah dhamaan kabadhada, albaabada, agabka iyo weelka. Diyaarinta isku darka 5000 ppm ah, isticmaal 1-2/3 koob oo jaafeesha bilaa urta ah iyo hal galaan oo biyo ah.
5. Ku masax dheecaanka jidhka. Isticmaal jaqaf iyo dhasbiinka si aad u xaqiijiso in dhamaan tuwaalada ku rido, boodharka nuuga waxaa laga masaxayaa mesha. Waxa aad ka taxadirtaa wixii wasakhda dheeraadka ah. Waxa aad dhamaan wasakhda ku daadisaa meesha wixii sunta ah lagu daadiyo ama bac.
6. Ku nadiifi aaga biyo diiran iyo saabuun. Hadii madaxa masaxaada la isticmaalo, waa inaad masaxaada u nadiifisaa sida saxda ah oo aad ka dishaa jeermiska kahor inta aan dib loo isticmaalin. Waxa aad daadisaa wixii tuwaale kale ah, boodharka wax nuuga meesha lagu daadiyo boodharka wax lagu nuugo ama bacda.
7. Waxa aad daadisaa wixii cunto ah ee yaala wixii u jira 25 fuudh meesha wax ka dhaceen.
8. Waxa aad tuurtaa golofiska kowaad ee aad iska saarto oo waa inaad rogtaa golifiska aad iska saarto. Ku farxalo biyo diiran oo leh saabuun ugu yaraan 25 ilbidhiqsi kahor inta aanad golifiska cusub xidhan.
9. Waxa ad jeermiska ka dishaa aaga adiga oo isticmaalaya jaafeel (5000 ppm) ugu yaraan 5 daqiiqo. Waa in meesha si wanaagsan hawadu usoo gashaa si looga hortago in uumiga sunta ah uu ku baxo.
10. Nadiifi jaafeesha aad qastay adiga oo isticmaalaya klinikis. Xaqiiji in dhamaan meeluhu yihiin nadiif oo wixii jaafeel ah ee dheeraad ah waa in meesha laga masaxaa.
11. Iskaga saar dhamaan PPE-yada si yaraynaysa in wasakh kusoo gaadho. Waxa aad ku ridaa dhamaan shayada PPE-yada bac. Waxa aad afka ka xidhaa bacda. Waxaad u tuurtaa bacda si amaan ah.
12. Si wanaagsan u maydh gacmahaaga.

### JAAFEESHA AAN QASNAYN

| Jaafeesha Qasan (5.25%)- Jaafeesha Guriga ee Bilaa Urka ah | Cufka |
|---|---|
| 1:10 (1-2/3 Koob oo Jaafeel ah 1 galaan ee biyo ah) | 5000 ppm |
| 1:250 (1 malqaacad oo Jaafeel ah 1 galaan ee biyaha ah) | 200 ppm |

### TUSAALAYAASHA AAGA JEERMISKA LAGA DILAYO

- Qasabada
- Gacanta distida
- Gacanta albaabka
- Agabka suuliga
- Gacanta jaran jarada
- Miisaska dushooda
- Aaga dhulka ee ku xeeran
- Kuraasta maqaaxida
- Miisaska
- Kuraasta
- Agabka cuntada
- Qalabka cuntada

## BUSHQADA DHEECAANADA JIDHKA

- Bushqada hore u diyaarsan waxaa loo iibsan karaa si loogu nadiifiyo wixii dheecaanada jidhka ah.
- Waxa aad xaqiijsaa in jeermis ka dilka kiimikaalka ee ku jira bushqadaada inay ku qoran tahay inay dilayso Norovirus.



## WAKHTIGA XAKAMAYNTA CAAFIMAADKA SHACABKA

- Isticmaal marka aad doonayso in aad cuntada ka saarto heerkulka. (Aan ahayn 41° F ama 135° F)
- Cuntada waa la daadiyo 4 saacad kadib.




### TUSAALAHA SIYAASADA

*(Ka eeg boga 76 wixii siyaasada dhamaystiran ah)*

Geli magaca xarunta halkan



**lagaca Hawlwadeenka** ______________________ **Taariikhda** ________

______________ waxa uu leeyahay siyaasada dhigista ama kaydinta cuntooyinka aar xumaada (wakhtiga/heerkulka la maamulay ee amaanka ah) heerkulka u dhaxeeya 1° F iyo 135° F wixii sababo gelin ah. Cuntada lasoo dhigay ama la kaydiyay ee taala meel a baxsan talaagada ama wixii ka hooseeya kululka ugu yar ee ay tahay in lagu hayo ʼaxaa kamid ah:

- **QOR CUNTOOYINKAAga** ee lasoo dhigayo ama lagu kaydinayo inta u dhaxaysa 41° F iyo 135° F (Aaga Khatarta Heerkulka). Siyaasadan waxay kaliya khusaysaa cuntooyinka gaarka ah ee ku qoran liiska kore.

/akhtiga heerkulka la xakameeyay waxaa loo isticmaali karaa in lagu muujiyo ama la higo cuntooyinka hore ugu qornaa, laakiin cuntooyinkan weligoodna kuma sii sugnaan oonaan heerkulka 41° F iyo 135° F wixii 4 saacadood ah ee ka badan. Marka wakhtiga an lahayn xakamaynta herkulka waxaa loo isticmaalayaa xakamaynta caafimaadka ıacabka ee ugu badnan afar saacadood kadib nidaamyada waxaa la dhaqan gelin oonaan u hogaansanka sharciga 3717-1-03.4 (I) ee Xeerka Cuntada Ohio..

- Cuntada waa inay yeelataa heerkulka hore ee 41° F ama wax ka yar talaagada ama 135° F ama ka sareeya marka laga qaado kulaylka.
- **Cuntada waa in lagu calaamadiyaa taariikhda iyo saacada marka laga qaado xakameeyaha heerkulka kulayl/qabaw iyo wakhtiga la daadinayo (afar saacadood oo ka bilaabma marka laga saaro heerkulka).**
- Cuntada waa in la kariyaa oo la bixiyaa, lagu bixiyay heerkulka hadii cuntada diyaarka ah la daadiyo afar saacadood gudahood oo laga bilaabo saacada marka laga saaro xakameeyaha heerkulka.
- Wixii cunto ah ee weelasha aan lahayn sumada ku jira ama sumada leh ee ka badan afar saacadood xadiga ah waa la daadinayaa.

lidaamyadan waxaa lagala hadlayaa dhamaan shaqaalaha ka shaqeeya cuntada si loo ɑqiijiyo inay fahmeen nidaamka maareynta cuntada ee amaanka ah ee daruuriga u ah ahortaga xanuunada cuntada.

lidaamyada waxaa xadidmaha xoojinta kahortaga iibka ama isticmaalka wixii cunto ah ee ısoo dhigay ama lagu kaydiyay heerkul ka sareeya 41° F ama ka hooseeya 135° F wixii ka adan afar saacadood.

lidaamyadan waxay kaliya khuseeyaan cuntooyinka lagu sheegey marka hore ee ıguhayo talaagada ama wax ka hooseeya heerkulka ugu yar ee lagu hayo wixii saababo unto karinta ah oo gaar ah.

ıhaka ku sugan ______________ waxa aanu fahanay kaalinta muhiimka ah ee y ka ciyaarto xakamaynta heerkulka saxda ah ee kahortaga xanuunada cuntada iyo si ıxadir leh u kormeerka isticmaalka nidaamyadan si loo xaqiijiyo in amaanka cuntadu aanu ɔinayno. Siyaasadan kaliya waxay khusaysaa iibinta cuntada ee u baahan in si gaarka ah ɔoga shaqeeyo iyo nidaamyada heerarka aan caadiga ahayn ee dhamaan cuntooyinka anu diyaarino ee aanu iibino.

Geli magaca xarunta halkan



## XAKAMAYNTA CAYAYAANKA



Dhibaca madaw waxaa weeye xaarka baranbarada.



[sawirka waxaa qaaday: David~O on Visualhunt.com]

Jiirka iyo baran baraha waxaa weeye cayayaan dadka u keena xanuuno. Si looga hortago cayayaanka, waxa aad masaxdaa wixii daata, cuntada oo waxa aad burburisaa meelaha ay ku noolaan karaan cayayaanku. Waa inaad shaqaalaysiisataa shirkad cayayaanka la dagalaanta oo liisan haysata si ay cayayaanka gurigaaga uga saarto. Iskaa ha isku dayin in aad guriga uga saarto.

## AAGA QASHIN QUBKA

- Meelaha qashinka ka nadiifi cuntada iyo wixii daatay.
- Weelka saliido la isticmaalay ha madhnaado.
- Yaanu weelka saliidka la isticmaalay noqon uskag maadaama oo aytani soo jiidan karto cayayaan badan.
- Albaabada/daabaquhu waa inay xidhanaadaan. Hadii aad furto, waa inay leeyihiin shacag oo waa inay wada gaadhsan yihiin oo ayna lahayn meel banaan.





## HOYGA







Kartoonada dib HA u istimcaalin. Waxay wataan baakteeriyo (jeermis) oo waxay horseedi karaan inay dadku ku xanuunsadaan.

Sidoo kale, baran barada waxay jeceshahay inay ku noolaato kartoonada.

Waxa aad daadisaa wixii aan loo baahnayn ee soo jiidan kara cayayaanka.

## FARXALKA




1. QOYAN
2. XUNBO
3. XOQ 20 ILBIDHIQSI
4. BIYO RAACI
5. QALAJI

### FARXALO KAHOR

- Inta aanad xidhan golofis
- Ha taaban cuntada
- Bilaw shaqo cusub

### FARXALO KADIB

- Isticmaalka suuliga
- Laga shaqeeyo weelka uskaga ah
- Inta laga baxo lagu soo noqonayo madbakha
- Banaanka u saarto qashinka
- Ka shaqayso kiimiko
- Ka shaqayso hilib, digaag, ama kaluun qaydhiin
- Wax cunto ama cabto
- Taabato timaha, wajiga ama jidhka
- Lacag qabato
- Hindhisto ama qufacdo

## SHURUUDAHA BULAACADA GACANTA








- Saabuunta, kilinikiska, iyo caalamadaha farxalka waa inay markasta dul yaalaan meesha lagu farxalanayo.
- KALIYA ku farxalo bulaacadan.
- Biyuhu waa inay noqdaan 100˚ F.
- Haku farxalan bulaacada sadexda meelood leh.
- HA dhigin ama ku maydhin bulaacada farxalka alaabaadka.



## ISTICMAAL GOLOFIS





- U isticmaal golifiska ama agabka wixii cunto ah ee diyaar ah.
- Ha isticmaalin golofiska caaga ah.

**CUNTADA DIYAAR AH:**
Cuntada si amaan ah loo cuni karo iyada oo aan la diyaarin.

- Bedel golofiska hadii ay dilaacaan, ama wasakh soo gaadho. Golofiska ayaa ku wasakhoobi kara suuliga, marka sigaarka la cabayo, qufacayo, hindhisayo, iyo inta u dhaxaysa diyaarinta cuntada qaydhiin iyo karinteedaa. U maydh oo si sax ah u qalaji gacmaha kahro inta aanad golofis cusub xidhan.





## XAKAMAYNTA TIMADA

- Waxa aad timaha uga ilaalisaa cuntada qaababkan.










## WAX CUNISTA AMA CABISTA

- Shaqaaluhu waa inay wax ku cunaan oo ku cabaa meelaha loogu talo geley.
- Waxa aad ku kaydisaa cuntada meel ka fog agabka iyo cuntada macmiilka.



## SHAYADA SHAKHSI AHAANEED

- Waxa aad ka fogaysaa dhamaan shayada shakhsi ahaaneed cuntada iyo alaabaadka. Furayaasha, taleefanada, dharka, iyo shayada kale ee ay dhici karto inay meesha shaqada wasakh soo gaadhsiin karaan.



## NAFAADAHA SHAQAALAHA

- Ha shaqaynin hadii aad qabto hindhiso, qufac, ama duuf badan.





## HEERKULKA

Waxa aad isticmaali kartaa digrii Sershiyas. Baadhaha caafimaadka ayaa isticmaalaya heerkulada oo digrii Faaranayt ah. Waa inaad barataa heerkulka amaanka ah oo ah miisaanka digrii Faranayt ah.




### AAGA KHATARTA

- **Haku kaydin cuntada inta u dhaxaysa 41° F iyo 135° F.**
- **Baakteeriyada ayaa ku dhalata heerkuladan.**

## ILAALINTA WAKHTIGA/HEERKULKA (TCS) EE AMAANKA

Jeermiska ayaa si fudud ugu dhasha oo dhakhso ah cuntada qaar marka loo eego kuwo kale. Cuntooyinkan waxaa loo yaqaan cuntooyinka TCS. Wakhtiga iyo heerkulka waxaa loo adeegsadaa in lagu xakameeyo ku dhalashada baakteeriyada ee cuntooyinkan. Tusaalayaashu waa:



Caanaha iyo wixii caanaha ka samaysan



Qolofta beedka (marka laga tago kuwa lagu maydhay Salmonella spp.)



Hilibka; hilibka, doofaarka iyo adhiga



Digaaga



Kaluumayso



Shelfiishka iyo crustaceans



Baradhada la dubay



Cuntada dhirta ah ee la diiriyo, sida bariiska, biiniska iyo khudaarta la kariyo



Tofu iyo borootiinta kale ee soy-ga Waxyaabaha cuntada lagu daro ee samayska ah, sida borootiinka soyga ee samaysska ah ee cuntada kale lagu daro



Biqilka iyo siidhka biqlay



Xabxabka, tamaandhada, iyo caleemaha cagaarka ah ee la jarjaray



Isku darka saliida iyo toonta aan waxkale lagu darin

## DIYAARINTA CUNTADA

- Ha dhigin wixii cunto ah ee dheeraad ah ee ayna ahayn inaad diyaariso. Kaliya lasoo bax waxa aad doonayso.





## CUNTADA DIYAAR AH

- Cuntada si amaan ah loo cuni karo iyada oo aan la diyaarin.





## HEERKULBEEGA










### KICINTA HEERKULBEEGA

Heerkulbeega waa in loo habeeyaa sida saxda ah. Buuxintu waxay ka dhigan tahay in la habeeyo heerkulbeega si loox xaqiijiyo inay diyaar u tahay inuu akhrinayo heerkulka saxda ah.

Heerkulbeegyada waxaa loo baahan yahayin la kiciyo todobaad kasta si loo xaqiijiyo inay akhrinayaan heerkulka saxda ah oo uu markasta saxan yahay.

- Isticmaal baraf iyo biyo, ama biyo diiran.
- Habee heerkulbeega si aad u xaqiijiso inuu akhrinayo 32° F biyaha barafka ee qabaw ama 212° F biyaha kulul.
- Bedel wixii heerkul beega saacada dhijitaalka ah leh ee aan saxnayn.

- Isla markaba nadiifi marka aad isticmaasho kadib. Shaashada waa in aanad qoynin.
- Heerkulbeega waa in lagu cabiraa heerkulka qabawga iyo kulaylka.
- Waxa aad afka u gelisaa qaybta adag ee cuntada.
- Waxa aad ku riixdaa gudaha ilaa inta ay gaadhayso dareemaha ama dimbelka.

## CUNTADA LA HELEY

- Waxa aad xaqiijsaa in cuntooyinka TCS* aad ka saarto talaabada isla markaba. Qaad heerkulbeega shayada cuntada ee TCS.
- Cuntada TCS ee qabaw waa inay lagu helaa 41° F ama wax ka hooseeya.
- Qolofka beedka qaydhiin waa inuu noqdaa marka la soo qaadayo 45° F.
- Caanaha waa in lagu qaado 45° F, waa in lagu kariyaa 41° F 2 saacadood gudahood.

## HAYNTA QABAWGA

- Waa in noqdaan 41° F ama ka yar.
- Qolofka beedka qaydhiin waa in lagu hayaa 45° F. aa wax ka hooseeya.
- Waxa aad ku haysaa heerkulbeega qaboojiyaha si aad u xaqiijiso in cuntadu si amaan ah u qaboobaato.



*TCS = Maamulaha Wakhtiga/Heerkulbeega ee Amaanka Cuntada (eeg boga 20)

## KAYDKA CUNTADA

- Weligaa hagu kaydin cuntada qaboojiyaha ama barafeeyaha.
- Ku kaydi cuntada meel amaan cunto oo amaan ah si aad u baajiso inay sumaydo.
- Weligaa haku kadin cuntada sanduuqa marka kaliya la isticmaalo.



## KAYDINTA HILIBKA QAYDHIIN

- Markasta cuntada qaydhiin ka hosaysii cuntada diyaarka ah oo u kala hooseeyaan:
  - Cuntada diyaar ah
  - Kaluunka qaydhiin
  - Hilibka isku dhan ee qaydhiin
  - Hilibka jarjaran ee qaydhiin
  - Digaaga qaydhiin




## HILIBKA SUUGADA QAYDHIIN

- Waxa aad ka eeibsataa cid liisan leh.
- Ma maydhin digaaga qaydhiin. Waxay faafisaa baakteeriyada.



## BARAFAYNTA CUNTADA

### CUNTOOYINKA TCS EE LA DHALAALIYO

- Cuntada lagama saraysiin karo 41° F.
- Waxa aad cuntada barafaysan ku ridaa kuukarka oo ah 41° F AMA waxa aad dhigtaa cuntada biyo qabaw oo socda hoostood bulaacada.
- Weligaa haku dhahaalin biyo kulul ama biyo heerkulka qolka ah.



### DHALAALINTA CUNTADA BARAFAYSAN WAXAY KA YARAYSAA OGSAJIINTA BUSHADA (FIRIDA) KALUUNKA

- Kaluunka waxaa lagu duubi karaa bac.
- Ku dhalaali kaluunka qaboojiyaha.
- Waxoogaa yara dilaaci bacda si ay hawadu ugu gasho.







## MAYDHISTA DALAGA

- Maydh dhamaan khudaarta bisil iyo cagaaran ee qaydhiin kahor inta aanad jarjarin.
- Ku maydh biyo aad ku diyaarisay bulaacada.
- Waxa aad isticmaali kartaa maydhaha khudaarta hadii aad si aa hayso tijaabiyaha saxda ah.





## LOOXA LAGU JARJARO

- Waa in la maydhi karo.
- Waa in aan si qoto dheer loo jarin.
- Maydho gacmaha kaidb markasta oo aad jarjarto cuntada iyo kahor inta aanad cunto kale u wareegin.
- Isticmaal loox oo wax lagu jarjaro oo waxa aad u kala saartaa hilib qaydhiin, digaag iyo kaluun.





## HEERKULKA WAX KARINTA

# "Weli ma dhamaysay?"

**Kuma garan kartid eegitaan.**

**Isticmaal heerkulbeega cuntada si aad u xaqiijiso.**

**USDA - Heerkulka Gudaha ugu Yar ee Ay Ku Taliso**



145° F

**DHAMAYSTIRAN**

Hilib, Doofaar, Hilib Lo'aad, Adi, Isteeg, Ka La Moofaynayo & Jarjaran



145° F

Cuntada Beedka



145° F

Kaluumayso

Shelfiishka





165° F

**ISKU DHAN, JARJARAN & GARAACAY**

Digirin, Digaag, Xuur




155° F

**GARAACAY**

Hilib, Doofaar, Hilib Lo'aad, Adhiga La Garaacay

## DIB U DIIRINTA WAXA SOO HADHAY

- Heerkul ah 165° F.
- Xaqiiji inaad walaaqdo cuntada. Kuluyl isku mid ah.
- Isticmaal agabka wax lagu kariyo.
- Marna dib ha ugu diirin miiska qiiqa leh.
- Cuntadu waa inay ahaataa 135° F ama ka sareysaa kahor inta aan la saarin miiska qiiqaya.

## HAYNTA KULAYLKA



- Cuntada waa in lagu hayo 135° F ama wax ka sareeya

## QABOOJINTA CUNTADA





- 135° F ilaa 70° F 2 saacadood gudaheed
- 70° F ilaa 41° F 4 saacadood gudaheed ee xiga

## QAABKA QABOOJINTA






*[sawirka waxaa qaaday: Hay'ada Maamulida Adeega Cuntada Qaran: Jaamacada Mississippi]*

- Walaac shayga saacad kasta.
- Weel bir ah ayaa ugu wanaagsan.
- Isticmaal huudhi adag.
- Waxa aad ka dhigtaa kala badh.
- Ha daboolin inta uu karsanayo.



Isticmaal waadh baraf.



Isticmaal maydhi baraf.



Isticmaal blast chiller ama talaagada la dhax galo.

- Ha qaboojin adiga oo isticmaalaya khadka qabaw.
- Cuntadu waa inay ahaataa 41° F ama ka hooseeya kahor inta aan la saarin miiska diyaarinta.

## KU QORISTA TAARIIKHDA






- Markasta ku qor taariikhda cuntooyinka TCS la daadinayao 7-maalmood kadib.
- Waxa aad warqada ku dhajiysaa weelka cuntada si loo garto wakhtiga la tuurayo.
- Hadii kaastar laga sameeyo 12/9, waa in la daadiyaa 12/15 kadib maalinta 7 ee la daadinayo. Hadii kaastardhiga loo isticmaal macaan 12/12 ah, macaankaas waa in la daadiyaa 12/15, maadaama oo ay dhaafayso dhamaan waxyabaaha kale ee ku jira cuntada si looga hortago inay dadku ku xanuunsadaan.






## WARAAQAHA CUNTADA MOORSAN



**Buskudka Jajabka Jaglaydhka**
PickYourOwn.org Cookies Co.,
456 Elm St. Jefferson City, MO 6510

Waxa uu ka samaysan yahay: Daqiiq xoogan (daqiiq qamadi, niacin, bar ka yareeye, thiamine, mononitrate, riboflavin, folic acide), badhar (caano, milix), shaglaydh jajaban (sonkor, dareere shaglaydh, badhar koko, badhar dux (caano), soy, lecithin (oo ah is dhax geliye), sonkor, beed, milix, faniilada dabiiciga ah ka laga saaray, beekinsowda.

Miisaanka rasmiga ah 3 wiqiyadood (89g)
Waxkaa ku jira qamadi, beed, caano, sooy

- Magcaa loo yaqaan cuntada
- Cinwaanka iyo magaca xarunta
- Liiska shayada ay u badan tahay (ka ugu badan ilaa ka ugu yar)
- Xasaasiyado
- Miisaanka rasmiga ah

## WARAAQAHA WEELASHA EE SHAQAYNAYA

- Waraaqada weelka cuntada ee wataday magaca shayga.
- Waraaqo dhajis ah, sumado, ama calaamado loo isticmaali karo.



## XASAASIYADO



### XASAASIYADA CUNTADA EE CAAMKA AH

- Caano
- Qamadi
- Digirta
- Beedka
- Lawska
- Kaluunka (sida bass, flounder, ama cod)
- Lawska geedka (sida almonds, pecans, ama walnuts)

| ASTAAMAHA CAANKA AH EE XASAASIYADA CUNTADA | | | |
|---|---|---|---|
|  | Finan cuncun leh |  | Hunqaaco |
|  | Yayaalugo ama calo-ol xanuun |  | Neeefka oo Ku Qa-bata/Hiiraag |
|  | Shuban |  | Barar |

**XAALADAHA DARAN, JAWAAB CELINTA XASAASIYADEED AYAA KEENI KARTA DHIMASHO.**

## TALADA MACMIILKA

- Liiskaaga waa inay ku jiraan talooyinka macmiilka hadii aad bixiso cunto qaydhiin ama aan karsanayn. Taladu waa inay tidhaahdaa: "Isticmaalka hilibka, digaaga, kaluunka, shellfish-ka ama beedka qaydhiin ama aan karsanayn waxa uu kordhiyaa khatarta xanuunada cuntada laga qaado."

> **TALADA MACMIILKA**
> ISTICMAALKA HILIBKA, DIGAAGA, KALUUNKA, SHELLFISH-KA AMA BEEDKA QAYDHIIN AMA AAN KARSANAYN WAXA UU KORDHIYAA KHATARTA XANUUNADA CUNTADA LAGA QAADO, GAAR AHAAN HADII AAD QABTO XANUUNADA QAAR.

## TILMAMAAHA KA SHAQAYNTA EE AMAANKA AH

- Tilmaamahan waxaa waajib ah inlagu dul qoro dhamaan hillibka iyo digaaga qaydhiin.

> **Tilmamaaha ka shaqaynta ee amaanka ah**
>
> Alaabtan waxaa laga diyaariyay hilib iyo/ama digaag la baadhay oo ka gudbay. Cuntooyinak qaar waxay yeelan karaan baakteeriya keeni kara xanuun hadii si khaldan loo isticmaalay ama aan si sax ah loo karin. Wixii badbaadadaada ah, waxa aad raacdaa tilmaamaha maareynta amaanka ah.
>
> 
>
> Haku jiraan talaabada ama firiisarka.
> Ku dhalaali talaagada ama mikrooweefka.
>
> Waxaa kala fogaysaa hilibka iyo digaaga qaydhiin iyo cuntada kale. Waxaad maydhaa meelaha la taataabto (waxaa kamid ah meesha wax lagu jararo), agabka wax lagu cuno, iyo gacmaha kadib marka lagu taabto hilibka ama digaaga qaydhiin.
>
> Si wanaagsan u kari.
>
> Cuntada diiran ha kululaato. Wixii ku soo hadhay talaagada isla marbaka daadi.

## CUNTADA GURIGA LAGU SAMEEYAY





- KUMA samayn kartid iskaa cuntada guriga haysataayi.
- Cuntada waa inay samaysaa xarun liisan

## DAASAD FURAHA

- Isticmaal furaha leh mindida si daasada looga furi si loo nadiifiyo.











## DAASADAHA

- Ha isticmaalin daasadaha faaxay, miridhka leh ama naburka leh.







## AGABKA







- Waa in ganacsi ay noqdaan.
- Laga isticmaali karo agabka guriga.

### AGABKA IYO WAXA WAX LAGU CUNO EE LA NADIIFIN KARO

- Agabka loo baahan yahay in la nadiifin karo.
- Hadii aanad hadhaaga ka jarin karin agab, waa in la bedelaa.
- Ha isticmaal duubka tinka ahama kartoonka saaran gabadhka.
- Maqasyada waa in loo kala furaa nadiifinta.



## SHAYADA MARKA KALIYA LA ISTICMAALO





- Weelka iyo weelka cuntada badan waxaa loo sameeyay in markaliya la isticmaalo oo la daadiyo.
- Tusaalayaasha waxaa kamid ah: warqada waxiga, waraaqaha hilibka, bacda lagu duubo, weelka cuntada ee almuuniyeeka ah, quruuradaha, bacaha duubka, duubka roodhida, baareelada bikilka, quruuradaha kajabka, iyo daasada 10-ka ah.

## KAYDKA



### KAYDINTA QALALAN

- Waxa aad dhigtaa shayada marka kaliya la isticmaalo, agabka iyo cuntooyinka meel u jirta 6 fuudh (15cm) oo ka sareysa dhulka.
- Samee taas xataa hadii shayadu ay ku jiraan kartoon.

### KAYDINTA AGABKA

- Ku kaydi cuntada aaga nadiif ah si looga hortago xanuunada macaamiisha.
- Agabka sida mingiyada ama toongada, waa in la badalaa ama la badaiifiyaa oo jeermiska laga dilaa 4 saacadood oo kasta.
- Haku kaydin weelka baaldi biyo ku jiraan.

## NADIIFINTA BULAACADA SADEX QAYBOOD AH SET UP










1. Farxalo.
2. Nadiif oo jeermiska ka dil qayb kasta.
3. Ka buuxi qaybta midix biyo kulul iyo sabuun.
4. Ka buuxi qaybta dhexe biyo kulul.
5. Ka buuxi qaybta midig biyo diiran iyo jeermis dilaha sida jeermisdilayaasha quaternary ammonium ama chlorine.



## JEERMIS DILAHA CHLORINE

1. Sodium Hypochlorite waa inay ku qoran yihiin waxay ka samaysan yihiin. Ha isticmaalin jaafeesha leh urta.
2. Ku dar hal malqaacadn oo chlorine/jaafeesha ah 5% halkii galaanka ee biyo ah oo isku qas.
3. Waxa aad dilaacisaa laba inji oo tijaabada ah. Waxaad muruuqisaa tijaabiyaha jeermis dilaha hal ilbidhiqsi.
4. Waxa aad is barbar dhigtaa midabka shaxda ee tijaabiyaha.
5. Waa inay noqotaa 50 ppm ama wax ka sareeya.
















**MIIQA TIJAABADU WAXAY LEEDAHAY TAARIIKHDA AY DHACAYSO. BEDEL MARKA AY DHACDO.**

**HA QALALNAADO MIIQA TIJAABADU. WAXA AAD DAADISAA HADII AY QOYDO.**



## JEERMIS DILAHA QUATERNARY AMMONIUM



















1. Quaternary ammonium waa inay ku qoran yihiin waxay ka samaysan yihiin.
   a. Hadii aad isticmaalayso qaabka kiniinka, waxa aad kiniinka ku diraa biyaha. Kiniinku wuu milmi doonaa.
   b. Hadii aad isticmaalayso jeermis dilaha quaternary ammonium, waxaad raacdaa tilmaamaha biyaha saxda ah ee xadiga quaternary.
2. Waxa aad sugtaa ilaa inta ay xumbadu meesha ka baxayso.
3. Waxa aad dilaacisaa laba inji miqa tijaabada. Waxaad muruuqisaa tijaabiyaha jeermis dilaha biayaha oo waxa aad ku haysaa 10 ilbidhiqsi. (Raac tilmaamaha miiqa tijaabinta; qaar ayaa u baahan kara wax ka badan 10 ilbidhiqsi.)
4. Waxa aad is barbar dhigtaa midabka shaxda ee tijaabiyaha.
5. Waxa aad eegtaa jeermid dilahaaga hadii uu yahay inta u dhaxaysa 200-400 ppm AMA 150-400 ppm.
6. Hadii jeermis dilaha bamka uu ka yimid oo aanu noqon intaas inta u dhaxaysa, waxa aad la xidhiidhaa shirkadaada kiimikada.






## AGABKA NADAAFADA

Markasta isticmaal bulaacada sadexqa qaybood eh oo leh qasabad saliid leh oo wax lagu maydho.

1. Ka masax ama biyo kaga maydh.
2. Ku maydh weelka marka hore bulaacada. Ha isticmaalin isboonji. Isticmaal maro aad ku maydho ama burush aad ku masaxdo.
3. May maydh milaydhada badhtanka bukaacada. Dhamaan sabuunka waa in laga saaraa alaabaadka. Biyaha sida loogu baahdo u dib ugu buuxi.
4. Jeermiska ka dil blaacada sadexaad. Weelka waxaa loo baahan yahay in si wanaagsan loo wada dhax geliyo jeermis dilaha uguyaraan 1 daqiiqo.
5. Hawada ku qalaji dhamaan weelka kahor inta aan biyo laga raacin. **Maro haku qalajin!**










**FARXALO KADIB MARKA AAD QALAAJISO WEELKA IYO KAHOR INTA AANAD TAABAN MID NADIIF AH.**






## GACN KU DEJINTA MISHIINKA WEELKA MAYDHA



Waxa aad dejisaa mishiinkaaga weelka maydh bishii hal mar. Waxaa lagu samayn karaa gacanta hadii mishiinka weelka maydhaa aanu lahayn wareega dejinta. Miisaanka waxaa weeye ka cad ee ku samaysan ee ay keento alaabta ka buuxsanta biyahaaga.

1. Biyaha ka shub.
2. Waxa aad ka saartaa bamka saabuunta (taydha) oo waa in aad shidaa mishiinka dhawr mar ilaa inta ay qaadanayso inta uu bamku saabuunta soo daadinayo.
3. Waxa aad ku dartaa xadiga saxda ah kiimikaalka la dejinayo.
4. Xidh albaabta si aad u bilawdo wareega. Ha socdo 30 daqiiqo oo waxa aad furtaa albaabka.
5. Ha yaalo ilaa 15-20 daqiiqo.
6. Xidh albaabta si aad u dhamaado wareega.
7. Dib u geli tuunbada saanuunta (taydha).
8. Diyaari saabuunta (taydha) si loo xaqiijiyo in la geliyo mishiinka si loo nadiifiyo weelka.
9. Biyaha ka daadi oo dib u buuxi laba jeer kahor inta aan la maydhin wax alaabaad ah.

## WAREEGE DEJINTA TOOSKA AH




*[sawirka waxaa qaaday: acsmt.com]*

1. Biyaha ka daadi.
2. Dooro wareega dejinta.
3. Xidh albaabta si aad u bilawdo. Fur alabaabka marka laguu sheego si aad ugu darto dejinta kiimikaalka sida ku qoran warqada.
4. Ka daadi oo dib u buuxi laba jeer kahor inta aanad isticmaalin weel nadiifiyaha.

## MISHIINKA WEELKA MAYDHA









- Bilaydhka xogta waa inuu ku jiraa mishiinka oo uu sheegaa heerkulka loo baahan yahay ee talaabooyinka maydhiga weelka iyo biyo raacinta.
- Xaqiiji heerkulbeea iyo xadhiga cadaadiska ee shaqaynaya.
- U nadiifi gudaha mishiinka sida loogu baahdo.
- Weelasha waxaa loo baahan yahay in marka hore lasii nadiifiyo.

## KIIMIKAALKA LA KULLEEYAYAY EE MISHIINKA WEELKA MEYDHA EE IOW

- Kiimikaalka jeermid dilaha loogu isticmaal badan yahay waxaa weeye chlorine.
- Saabuunta (taydha), biyo kaalmeeya iyo jeermis ka dilaha waa in lagu bam gareeyo mishiinka weelka maydha.
- Ku walaaq miiqa tijaabiyaha jeermis dilaha ee goobta si aad u waafajiso walaaqaha. Si loo tijaabiyo jeermis dilaha, waxa aad ku ridaa weelasha qaar mishiinka oo waxa aad gelitaa miiqa tijaabada weelasha qoyan kadib marka uu dhameeyo wareega mishiinka weelka maydhaayi. Hadii jeermis diluhu aanu u dhaxaynin inta loogu talo geley, waxa aad ka eegtaa weelka jeermis filaha si aad u aragto hadii uu madhan yahay. Hadii weli uu ku jira jeermis dile, la xidhiidh shirkada kiimikaalka.




## SIDA LOO DIYAARIYO JEERMIS DILAHA AMA SAABUUNTA (TAYDHA)

Hadii aad bedeshey weelka kiimikaalka ee madhan, waa in aad diyaariso weelka cusub ee jeermis dilaha ama saabuunta (taydha).

- Hadii tuunbadu ay madhan tahay, waa in saabuun ayna gelin mishiinka weelka maydha.
- Shid mishiinka weelka meydha ama waxa aad haysaa badhanka diyaari.
- Jooji marka aad aragto saabuunka oo tuunbada hoos u socota oo leh xunbo.

## MISHIINKA MAYDHKA WEELKA HEERKULKA SARE

Mishiinka maydhka weelka heerkulka sare waxaa uu isticmaalaa biyo kulul si uu jeermiska halkii uu kiimiko ka isticmaali dilaa.

- Isticmaalka biyo kulul si uu jeermiska halkii uu kiimiko ka isticmaali dilaa.
- Waxa ad u baahan tahay waraaqaha dhejiska heerkulka ama heerkulbeega heerkulka ugu badan si aad u tijaabiso heerkulka maalin walba.
- Waxa aad ka dhejisaa waraaqaha dhejiska ah weelka oo waxa aad shidaa mishiinka weelka maydha.
- Waxay bedeli doontaa midabka marka ay gaadhi heerkulkii loo baahnac




## HEERKULBEEGA HEERKULKA UGU SAREEYA

- Waxa aad ku ridaa heerkulka mishiinka weelka maydha oo waxa aad dhax marisaa wareega si aad u tijaabiso heerkulka.
- Mishiinka weelka maydha ee inuu gaadhaa 160° F ama ka sareeyaa.



## MASAXAADA

